


Raadinta Qaranka Madaxa Waaxda Boliiska Cusub ee Seattle Waxay ka Bilaabataa Fikradaha Deegaanka

Magaalada Seattle waxay ku hawlan tahay raadin qaran si loo helo fulliye waayo arag ah, si wanaagsan loo xushmeeyo, lala xisaabtami karo oo ka hawl gala Waaxda Boliiska Seattle (Seattle Police Department) (SPD) Ka qeybgelinta bulshada waxay lagama maarmaan u tahay xulashada hoggaamiye oo maamuli kara is-baddalada boliiska iyo dhismaha niyadda sarkaalka. Bishii Janaayo iyo ilaa bartamaha Febraayo 2014, Xafiiska Duqa Magaalada Seattle wuxuu dadka ku dhiirigelin doonaa in ay ka soo qeybgalaan wada hadal ku saabsan sifada ay rabaan in ay ku arkaan Madaxa Boliiska cusub ee Seattle.

Duqa Magaalada wuxuu 32 xubin u magacaabay in ay noqdaan Guddiga La Tallinta Bulshada (Community Advisory Committee) si ay u bixiyaan fikradaha bulshada iyo hoggaaminta xilliga hawsha raadinta. Magacaabidda Guddiga La Tallinta Bulshada (Community Advisory Committee) (CAC), Duqa Magaalada wuxuu magaaladana oo idil ku qaban doonaa shirarka bulshada iyo wuxuu samayn doonaa bogga internetka si fikrado looga helo bulshadaha kala duwan ee ku sugan Seattle. Fikradaha laga helo bulshada iyo saraakiisaha waxay kaalmo u yaahiin helitaanka Madaxa Boliiska ee sida wanaagsan ugu habboon dadka daggan Seattle iyo SPD.



“Madaxa Boliiskena waxaa looga baahan yahay in uu is-kaashi cusub ka dhex abuuro boliiskena iyo dadkena si ay u wada shaqeyaan uguna abuuraan Seattle xaafado ammaan ah oo caafimaad qaba.”

— Duqa Magaalada Ed Murray

BARTILMAAMEEDYADA MUHIIMKA AH

Janaayo 8, 2014	Ku dhawaaqidda xubnaha Guddiga La Tallinta Bulshada (Community Advisory Committee) kaddibna bilaabidda raadinta qaranka ee musharaxiinta.
Bartamaha Janaayo ilaa bartamaha Febraayo 2014	Fullinta hawsha xariirinta iyo soo aruurinta faalada
Bartamaha Janaayo	Xulashada shirkadda raadinta
Bartamaha-dhamaadka Febraayo 2014	Gabogabeeynta habka qiimeynta loo soo saaray guddiga raadinta
Dhamaadka Febraayo ilaa Bartamaha Maarso 2014	Wareysiyada Guddiga Raadinta (Search Committee) iyo xulashada kuwa ku soo hara tartanka duqa magaalada
Horaanta Abriil 2014	Xulashada Duqa Magaalada iyo ku dhawaaqidda Madaxa Boliiska cusub
Horaanta Abriil 2014	Guddiga wuxuu fiiriyaa/ku dhaga-aqaa xulashada Duqa Magaalada

Ka qeybgelinta bulshada

Xafiiska Duqa Magaalada wuxuu bulshada ku casumay in ay faalo ka bixiyaan sifooyinka la jecel yahay in uu leeyahay Madaxa Boliiska cusub. Waxaa jira siyaabo badan oo looga qeybgalo:

- Booqo bogga internetka Magaalada Seattle si aad in badan u ogaatid www.seattle.gov/spdchiefsearch
- Iska qor boggena internetka si laguugu soo diro emailo
- Waxaad fikradahaada ka soo jeedisaa shirarkena deegaanka <http://spdchiefsearch.com/>
- Tag tababarka bulshada:
 - **Talaado, Janaayo 28, 6-8 p.m.**
University Heights Center (Xarunta University Heights), Qolka 209
5031 University Way NE
 - **Arbaco, Janaayo 29, 6-8 p.m.**
Garfield Community Center (Xarunta Bulshada Garfield),
Qolka Danaha Badan (Multi-purpose Room)
2323 E Cherry St
 - **Qamiis, Janaayo 30, 6-8 p.m.**
Youngstown Cultural Arts Center (Xarunta Fanka Hiddaha Youngstown),
Movement Studio
4408 Delridge Way SW
 - **Sabti, Febraayo 1, 12-2 p.m.**
Van Asselt Community Center (Xarunta Bulshada Van Asselt),
Qolka Danaha Badan (Multi-purpose Room)
2920 S Myrtle St
 - **Talaado, Febraayo 4, 6-8 p.m.**
Pinehurst K-8 School, Lunchroom (Dugsiga Pinehurst K-8, Qolka Qadada)
11530 12th Ave NE
 - **Arbaco, Febraayo 5, 6-8 p.m.**
Nordic Heritage Museum (Matxafka Dhaxalka Nordic),
Qolka Shirarka (Auditorium)
3014 NW 67th St
 - **Qamiis, Febraayo 6, 6-8 p.m.**
Seattle City Hall, Bertha
Qolka Soo Dhaweynta Knight Landes (Knight Landes Reception Room)
600 Fourth Avenue

Waxaad boggena internetka ka heli doontaa macluumaadka ku saabsan shirarka CAC kuwaasoo u furan dadweynaha

Maxay yahiin astaamaha looga baahan yahay Madaxa Boliiska si uu si wanaagsan ugu adeego Seattle?

Xafiska Duqa Magaalada wuxuu soo saaray liis draafti ah oo ku saabsan aqoonta iyo xirfadaha looga baahan yahay Madaxa Boliiska si uu ugu guuleysto shaqadaan. Sifooyinka muhiimka ah waxaa lagu soo qoray dhanka midig, waxaana in badan oo tafatiran looga heli karaa www.seattle.gov/spdchiefsearch.

Noo sheeg waxa aad u maaleysid:

- Ma haysanaa liiska ku habboon sifooyinka si aan u qiimeyno musharaxiinta?
- Maxay yahiin saddaxda sifo ugu sareeyso ee loo baahan yahay in aan ka helno Madaxa Boliiska?
- Maxay yahiin arrimaha ugu muhiimsan ee aad rabtid in aad habsatid in aad tixgelino?
- Maxaad u sheegi lahayd Madaxa Boliiska cusub?



Nala soo xariir

Su'aalaha ama faalada la xariira raadinta Madaxa Boliiska xiga ee Seattle waa in loo jeediyo chiefsearchinfo@seattle.gov.

www.seattle.gov/spdchiefsearch

Mowduuca	Xirfadaha iyo aqoonta
Daacadnimo (Dabeecad xooggan)	<p>Asluub</p> <ul style="list-style-type: none"> • Wuxuu hirgeliyaa waxyaabaha ay aaminsan tahay SPD mana u dul qaato aadaab darrada boliiska ama takoorka • Waxaa dhab ka ah caddaaladda bulshada iyo fahamka hiddaha kale <p>Ku Dayashada</p> <ul style="list-style-type: none"> • Asluub xooggan xagga shaqada, isku kalsoon, loona tagi karo • Wuxuu dajiyaa iyo wuxuu hirgeliyaa heerarka shaqada
Istraatijiyada hoggaaminta	<p>Wada Shaqeynta</p> <ul style="list-style-type: none"> • U furan fikradaha cusub • Wuxuu si wanaagsan ula shaqeyaa siistemka cadaaladda dambiyada iyo bulshada labadaba • Wuxuu yareeyaa qilaafka, wuxuuna u adeegsadaa iskaashi <p>Wuxuu horumariyaa hiddo wanaagsan, oo muuqda</p> <ul style="list-style-type: none"> • Wuxuu abuuraa jawi ay saraakiisha ku guuleysan karaan • Wuxuu la xisaabtamaa shakhsiyaadka iyo ururka <p>Wuxuu nafaqeyaa iskaashiga bulshada</p> <ul style="list-style-type: none"> • Wuxuu soo saaraa iskaashiga bulshada iyo wuxuu si firfircoon uga soo qeybgeliyaa bulshada • Wuxuu bulshada ka hirgeliyaa hawsha boliiska
Maamulka	<p>Wuxuu hoggaamiyaa dadaalka lagu hagaajiyo waaxda boliiska</p> <ul style="list-style-type: none"> • Waxaa ku daraa dhaqamada ugu fiican • Wuxuu horumariyaa kala duwanaanta gudaha waaxda • Wuxuu dhiirigeliyaa shaqaaleynta iyo dadaalka tababarka <p>Wuxuu bixiyaa hoggaan wanaagsan xagga ilaha maaliyadda iyo shaqaalaha</p> <ul style="list-style-type: none"> • Wuxuu soo saaraa miisaaniyad ku habboon iyo wuxuu ku wareejiyaa mas'uuliyadda
Xirfadaha isdhexgalka iyo isgaarsiinta	<p>Wuxuu si wanaagsan oo wax soo saar leh ula kulmaa dad kala duwan</p> <ul style="list-style-type: none"> • Waxaa ka mid ah dadka laga tirada badan yahay iyo bulshada la fogaayo, kuwaasoo lala yeesho wada hadal furan, oo daacad ah. Waa la arkaa iyo wuu ku lug leeyahay bulshada. • Wuxuu si wanaagsan ula shaqeyaa saraakiisha la doortay si uu ugu doodo SPD • Si wanaagsan ayuu u dhageystaa una gaarsiiyaa
Waayaha maamulka shaqaalaha	<p>Wuxuu la shaqeyaa shaqaalaha wuxuun adeegsadaa istraatijiyada</p> <ul style="list-style-type: none"> • Wuxuu u hoggaansamaa heshiisyada shaqaalaha iyo wuxuu arrimaha shaqaalaha u xalliyaa si caddaalad ah iyo hab toosan
Aqoonta hawsha boliiska	<p>Wuxuu raadiyaa in uu si firfircoon u yareeyo dambiga iyo in uu horumariyo ammaanka dadweynaha</p> <ul style="list-style-type: none"> • Wuxuu la shaqeyaa hirgelinta sharciga gobolka iyo siistemka cadaaladda si loo hirgeliyo barnaamijyada yareynta dambiga <p>Wuxuu si wanaagsan ula socdaa arrimaha muhiimka ah</p> <ul style="list-style-type: none"> • Wuxuu ogsoon yahay sasaanka iyo cilmi baarista saameysa hawsha boliiska iyo ammaanka dadweynaha • Wuxuu fahmaa fikrado badan oo ku saabsan sida bulshada u aragto hawsha boliiska <p>Wuxuu dhiirigeliyaa heerarka sare xagga SPD</p> <ul style="list-style-type: none"> • Wuxuu horumariyaa kaalinta boliiska gudaha bulshada • Wuxuu qaataa fikradaha iyo wuxuu soo dhaweyyaa la xisaabtanka • Wuxuu saraakiisha ku dhiirigeliyaa in ay dadka kale ula dhaqmaan aadaab iyo ilbaxnimo

Si aad u heshid tarjamada warqadaan, fadlan la xariir chiefsearchinfo@seattle.gov.

Macluumaadka Sharciga Mareykanka Itaalka Darran (Americans with Disabilities Act) (ADA): Macluumaadka waxaa lagu heli karaa qaabab kale: far waaweyn, Braille, cajaladda la dhageysto, ama saxanka kombuyutarka ee la siiyo dadka itaalka darran marka lala xariiro chiefsearchinfo@seattle.gov ama 206-684-7991. Dadka dhagoolaha ama kuwa maqalka culus waxay codsan karaan qaabab kale oo laga helo Adeegga Laliska Washington (Washington Relay Service). nambarka 7-1-1.